Oregon Health Authority

QEYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Baaritaanka COVID-19 ee ka dhaca Dugsiyada K-12 ee Oregon: Su'aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo (FAQs) Baaritaanka Shaqaalaha

(La cusbooneysiiyay 10-25-2021)

S: Waa maxay Barnaamijka Baaritaanka Shaqaalaha?

Barnaamijka Baaritaanka Shaqaalaha wuxuu bixiyaa baaritaanka COVID-19 oo toddobaadle ah oo lacag la'aan ah kaasoo boosta ahaan loogu diro shaqaale kasta oo an la tallaalin oo katirsan dugsiyada K-12 ee dadweynaha ama kuwa gaarka ah.

S: Yaa u-qalma?

Shaqaale kasta oo K-12 ka tirsan oo dadweyne ama gaar ah, oo ay ku jiraan mutadawiciinta, ayaa u-qalma. Xubnaha kamidka ah shaqaalaha waa inay isku diiwaangeliyaan barnaamijkan.

S: Sidee ayaan isku diiwaangeliyaa?

Xubno kamidka ah shaqaalaha waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan foomka. Guji halkan. Macluumaadkan waxaa loo diri doonaa shaybaarka la ah iskaashiga barnaamijkan. Shaybaarka iskaashiga la ah OHA (Maamulka Caafimaadka Oregon), Willamette Valley Toxicology ayaa u soo diri doona iimayl soodhaweyn ah shaybaarkooda. Iimaylkan wuxuu qaadan karaa dhowr maalmood in la soo bandhigo. Markii si buuxda laguu soodhaweeyo waxay qaadanaysaa qiyaastii ilaa toddobaad in qalabka baarista uu ku yimaado.

S: Sidee ayay degmo-dugsiyeedka u diiwaangelisaa dhammaan shaqaalaha aan tallaalneyn?

Haddii degmo-dugsiyeedka uu rabo in shaqaalahiisa aan tallaaalneyn ay kaqaybgalaan, waxay u baahan doonaan inay la wadaagaan macluumaadkan shaqaalahooda aan tallaalneyn.

S: Degmo-dugsiyeedkaygu wuxuu rabaa inuu ogaado natiijooyinka tijaabada baaritaankayga?

Iskaashatada Waxbarashada waxay u bahaan donaan inay la tashtaan la-taliyahooda sharciga oo ayna kala shaqeeyaan shaqaalaha dugsiga helitaanka natiijooyinka.

S: Ma ikhtiyaari baa?

Haa. Barnaamijku waa ikhtiyaari.

S: Ma jirtaa xulashada muunada candhuufta oo loogu talagalay barnaamijkan?

Barnaamijkani wuxuu si adag u bixiyaa kaliya ka qaadista dheecaanka sanka.

S: Immisa ayey ku kacaysaa?

Barnaamijku waa lacag la'aan.

S: Maxaan filan karaa inta baaritaanku socdo?

Marka xirmada baaritaankaagu timaado, waxaa ku jiri doona tilmaamo muunad loogu qaadayo suufka jilicsan ee sanka.

S: Intee jeer ayaan heli doonaa baaritaanka guriga lagu qaado?

Shakhsiyaadka kaqaybqaadanaya waxay baaritaanka ka heli doonaan boostada toddobaadkiiba mar.

S: Sidee ayaan ku heli doonaa natiijooyinkayga?

Natiijooyinkaaga waxaa lagu soo bandhigi doonaa koontadaada LabDash. Marka natiijooyinkaagu diyaar noqoto, waxaad heli doontaa iimayl ama farriin gaaban oo xusuusin ah si aad u gasho oo aad u aragto.

S: Muddo intee le'eg ayay igu qaadan doontaa inaan helo natiijooyinka baaritaankayga?

Waxaad natiijooyinkaaga ku heli doontaa 3-5 maalmood gudahooda.

S: Miyay cid kale arki doontaa natiijooyinkayga ama macluumaadkayga caafimaad ee gaarka ah?

Natiijooyinkaaga iyo macluumaadkaaga caafimaad ee gaarka ah waa qarsoodi oo cidna la lama wadaagi doono.

S: Haddii la i tallaalay, ma inaan kaqaybqaataa barnaamijkan?

Baaritaan lagulama talinayo shaqaalaha K-12 ee tallaalan sababtoo ah halista COVID-19 ee dadka tallaalan aad bay u yar tahay.

S: Kawaran haddii aan beddelo go'aankayga oo aan rabin inaan kaqaybqaato barnaamijkan?

Waxaad ka bixi kartaa barnaamijka wakhti kasta.

S: Yaan kala xiriiraa wixii su'aalo dheeraadka ah?

Waxaad la xiriiri kartaa COVIDScreening.Schools@dhsoha.state.or.us oo qof ka socda Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa ka jawaabi doona su'aalahaaga.

S: Maxaan sameeyaa haddii la iga helo cudurka?

Waxaa ku soo wici doona baare kiis oo ka tirsan maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga oo kaala hadli doona sida looga hortago faafintaanka fayraska, oo ay ku jirto ku nagaanshaha guriga ama goob ay bixisay waaxda caafimaadka dadweynaha ilaa ay halistu ka dhammaato; bixin doona macluumaad caafimaad oo ku saabsan sida aad naftaada u daryeeli lahayd; waxayna kula wadaagi doona dhigaalada laga helo bulshadaada dhexdeeda kuwaasoo ku taageeri kara inta aad isgo'doominta kujirto.

S: Maxaan sameeyaa haddii la iga waayo cudurka?

Haddii lagaa waayo cudurka, waa inaad weli samaysaa taxadar si adiga iyo dadka kaleba aad u badqabtaan. Joogteynta kala fogaanshaha jireed iyo xirashada maskaro waa muhiim.

S: Maxaan sameeyaa haddii aan u-bayla noqday COVID-19 laakiin aan sugayo inaan maro baaritaankayga toddobaadlaha ah?

Waa inaad kala xiriirtaa bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka wixii hagis ah haddii aad u-bayla noqotay qof qaba COVID-19.

S: Iimaylka aan ka helay shaybaadhka wuxuu doonaya macluumaadkayga caymiska caafimaadka?

Tani waa su'aal caadi u ah bogga bukaanka (LabDash) ee ay isticmaalaan. Fadlan guji sanduuqa sare ee tilmaamaya ina aadan caymis lahayn iyo sanduuqa tilmaamaya ina aadan haysan aqoonsi ay dawladda bixisay. Laguguma soo dalacaayo barnaamijkaan.

S: Miyaan sameyn karaa baaritaanka isbuuclaha badelkii qaadashada tallaalka COVID-19?

Shaqaalaha dugsigu waxay u baahaan doonaan inay la shaqeeyaan dugsiga degmadooda si ay u eegaan haddii tani ay tahay ikhtiyaar ku habboon iyaga. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sharciga tallaalka, fadlan guji halkan.

S: Degmo-dugsiyeedka waxay rabtaa inay tan ka dhigto waajib.

Iskaashatada waxbarashadu waxay u baahan doonaan inay la tashadaan la-taliyahooda sharciga.

S: Mudo intee leeg ayay qaadataa in ay bilaabato helida xirmooyinka?

Marka xubin ka mid ah shaqaalaha si buuxda loo soo dhoweeyo, waxay qaadan doontaa ilaa toddobaad si loo helo qimaha agabyada bisha oo xirmooyinka tijaabada baaritaanka ah.

S: Sidee ayaan ula xiriiraa Willamette Valley Toxicology?

Khadka adeegga macmiilka WVT waa (541) 368-3050

S: Wax iimayl ah ama xirmooyinkayga baaritaanka kama aanan helin LabDash ?

Fadlan si toos ah ugala xiriir Willamette Valley Toxicology (541) 369-3050

S: Haddii dhawaan la iga helay COVID-19, weli ma kaqaybqaadan karaa barnaamijka?

Haddii lagaa helay COVID-19, kama qaybqaadan doontid barnaamijka baarista muddo 90 maalmood ah waxaadna u baahan doontaa inaad kala xiriirto Willamette Valley Toxicology si loo joojiyo oona loo bilaabo lahaa xirmooyinka.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka qaba naafanimada ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa macluumaadka qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit(Qeybta Isgaarsiinta COVID-19) lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.